

Qaybta Adeegyada Bulshada



Barnaamijyada Milcisadka Yar



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Waxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) waxaa ay ku dadaaleysaa in ay wax-ka-beddesho nololsha kuwa aan u adeegno. Barnaamijyada ay bixiso Qaybta Adeegyada Bulshada (oo uu maamulo Maamulka Adeegyada Dhaqaalaha) waxaa loo nakh-shadeeyay in ay ku caawiyaan macaamiisheenna in ay dhisaan aasaasyo adag sidaas darteed waxaa ay ku noolaan karaan noloshooda ugu wanaagsan waxaa ayna ku dadaali karaan dhammaan marxaladaha nololsha.

Agaasimaha Qaybta Adeegyada Bulshada ahaan, waxaa sharaf ii ah in aan la shaqeeyo in ka badan 2,500 shaqaale gaar ah si loo hubiyo in aan adeeg tayada ugu sarreysa leh siino dadka ku nool Washington. Waxaannu shaqadeenna qabanaa anagga oo u mareyna shabako xafiisyo degaanka ah, shaqaale fadhigooda yahay meelo ka baxsan xarunta dhexe, laba Xafiisyada Adeegga Bulshada oo Guur-guura iyo Xarunta Xiriirka Adeegga Macaamiisha ee gobolka oo dhan.

Waxaan filayaa in aad u aragto macluumaadka ku qoran buug-gacmeedkan mid caawimaad leh marka aad ka barato wax badan oo ku saabsan adeegyada iyo barnaamijyada aan bixinno. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyadeenna, fadlan haka gaabsanin in aad kala xiriirto Xarunteenna Adeegga Macmiilka 1-877-501-2233.

Mahadsanid.

Daacadnimo,



Babs Roberts / Agaasimaha / Qaybta Adeegyada Bulshada

Himilada:

Kobaca shakhsiyaadka, qoysaska iyo bulshooyinka

Hiigsiga:

In wax laga beddelo nololsha iyadoo awood loo siinayo shakhsiyaadka iyo qoysaska in ay kobcaan

Qiimayaasha:

Hal-abuur, Wada-shaqeyn, Ixtiraam, Isla-xisaabtan



Cuntada Aasaasiga ah

Shaqada iyo Tababarka Cuntada Aasaasiga

Barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah waxaa uu bixiyaa helidda cunto daray ah oo caafimaadqab leh, kuwaas oo aasaasi u ah in ay qoysasku kobcaan. Cuntada Aasaasiga ah waa isku-jirka Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeriga ah (SNAP) ee gobolka Washington oo ay dowladda federaalka maalgeliso iyo Barnaamijka Gargaarka Cuntada (FAP) oo uu gobolka maalgeliyo, kaas oo loogu talagalay muhaajiriinta sharciga ah ee aan weli xaq u lahayn dheefaha SNAP ee dowladda federaalka.

Qoysaska xaq u leh waxaa ay helaan kaarka dheefaha oo elektaroonig ah (EBT). Kaarka waxaa si toos ah dib loogu soo shubaa bil kasta qaddarka dheefta ee la go'aamiyay. Cuntada Aasaasiga ah waxaa loo adeegsan karaa in looga iibsado cunto iyo dhirta iyo abuurka cuntada soo saara dukaamada cuntada iibiya iyo suuqyada beeraha ee ka qaybgalaya.

Shaqo, adeegyo tababar iyo taageero shaqo ayaa la heli karaa iyadoo loo marayo barnaamijka Tababarka iyo Shaqada ee Cuntada Aasaasiga ah (BFET), ee loogu talagalay shakhsiyaadka xaq u leh ee qaadanaaya Cuntada Aasaasiga ah ee aan ahayn qaataha Gargaarka Aan Joogtada Ahayn ee loogu talagalay Qoysaska Baahan (TANF) ama dheefaha FAP. Eeg www.dshs.wa.gov/esa/community-partnership-program/basic-food-employment-training-bfet si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Barnaamijka Waayeellada, Indhoollaha, ama Naafada



Barnaamijka Waayeellada, Indhoollaha, ama Naafada (ABD) waxaa uu bixiyaa deeq kaash ah oo loogu talagalay dadka da'doodu tahay 65 ama ka weyn, indhoollaha ama naafo ah oo ay u badan tahay in ay buuxiyaan shuruudaha Dakhliga Damaannada Dheeraadka ah (SSI).

Iyadoo loo marayo barnaamijka ABD, ayaa shakhsiyaadka waxaa ay helayaan fursad ay kula xiriiraan adeegyada daryeelka caafimaad si wax looga qabto caqabadaha ka hortaagan in ay si buuxda uga qaybgalaan bulshooyinkeenna. Adeegyadan waxaa ka mid ah:

- Raadinta hagid xirfadeed iyo tababarro iyadoo loo marayo adeegyada baxnaanista xirfadeed si loo aqoonsado shaqo macno leh.
- Helitaanka barnaamijka Guryaynta iyo Baahiyada Aasaasiga ah (HEN) si loo helo guri ammaan ah, caafimaadqab leh oo la awoodi karo.
- Gargaarka shakhsi ahaaneed ee helitaanka barnaamijka Dakhliga Damaannada Dheeraadka ah (SSI) ee federaalka ee loogu talagalay taageerada maaliyadeed ee muddada dheer.

Barnaamijka U-gudbinta Guryaynta iyo Baahiyada Aasaasiga ah

Barnaamijka U-gudbinta Guryaynta iyo Baahiyada Aasaasiga ah (HEN) waxaa uu siiyaa shakhsiyaadka aan awoodin in ay shaqeeyaan ugu yaraan 90 maalmood iyada oo sabab u ah awood la'aan jireed iyo/ama dhimir, ee helidda waxyaabaha baahiyada aasaasiga ah. Waxyaabahan waxaa ka mid noqon kara sahayda caafimaadka iyo nadaafadda shakhsi, tikidyada lagu raaco baska iyo taageerada guryaynta suurtagalka ah sida kiro xaddidan, lacagaha korontada, gaaska iyo biyaha iyo caawimaad guuritaan.

Xaq-u-yeelashada barnaamijka HEN waxaa go'aamiya DSHS. Xaq-u-yeelashada gargaarka guryaynta ee barnaamijka HEN waxaa go'aamiya Waaxda Ganacsiga iyadoo loo marayo shabako ah ururrada adeegga bulshada degaanka ee caawiya dadka dareema guri la'aanta ama kuwa halista ugu jira noqoshada guri la'aan.




Barnaamijyada Kaalmada Daryeelka Carruurta

Barnaamijyada Daryeelka Carruurta Xiriirrada Shaqo (WCCC) iyo Daryeelka Carruurta ee Xilliyeedka waxaa ay kabaan kharashka daryeelka carruurta ee qoysaska xaqa u leh oo ay waalidiintooda ama mas'uuliyiintooda kale shaqeynaya ama ka-qaybgalaya hawl shaqo oo ay DSHS ansixixay, kuwaas oo carruurtooda ka soo baxa shuruudaha muwaadinimo. Qoysaska la kulma guri la'aanta ee ka shaqeyya bixiyayaasha daryeelka ehelka ayaa sidoo kale heli kara kaalmada daryeelka carruurta iyadoo loo marayo WCCC. Barnaamijka Daryeelka Carruurta ee Xilliyeedka wuxuu kabaa kharashka daryeelka carruurta qoysaska xaqa u leh ee si xilliyeed ah ugar shaqeyya beeraha, ku nool degmooyin cayiman kuwaas oo aan qaadanayn dheefaha Gargaarka Ku-meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF). Xaaladaha intooda badan, qoysaska helaya dheefaha kaalmada daryeelka carruurta waxaa ay mas'uul ka yihiin in ay bixiyaan lacag-bixinta la wadaago ee la siiyo bixiyahooda daryeelka carruurta, iyadoo qaddarka uu ku xiran yahay dakhliga qoyska.

Barnaamijyadan, DSHS waxaa ay gacan ka geysanaysaa bixinya daryeelka ay bixiyaan xarumaha daryeelka carruurta iyo guryaha daryeelka carruurta ee ruqsadda ama shahaadada haysta. WCCC, DSHS ayaa waxaa ay gacan ka geysan kartaa bixinta daryeelka ay bixiyeen:

- Xarumaha daryeelka carruurta ruqsadda ama shahaadada haysta.
- Guryaha daryeelka carruurta qoyska ee ruqsadda ama shahaadada haysta.
- Qaraabada la oggolaaday ee daryeelka ku bixiya gurigooda.
- Qaangaarada la oggolaaday ee gurigaaga yimaada si ay daryeelka u bixiyaan.



Gargaarka Ku-meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan iyo Gargaarka Qoyska ee Gobolka

Barnaamijyada Gargaarka Ku-meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF) iyo Gargaarka Qoyska ee Gobolka (SFA) waxaa ay xaqiijiyaan qoysaska Washington in ay haystaan qalabka lagu dhisayo aasaaska adag ee noloshooda, oo u oggolaanaysa in ay joojiyaan weerarada nolosha. Waxaannu tani sameynaa anagga oo ku xiriirinayna carruurta iyo waalidiinta khayraadkaas sida deeqo kaash ah oo yar oo aan joogto ahayn oo ku saleysan inta uu le'eg yahay qoyska, u gudbinta khayraadka bulshada (oo ay ku jiraan fursadaha barasho ee carruurta), iyo adeegyada WorkFirst ee loogu talagalay inta badan waalidiinta.

Qoysaska TANF/SFA ayaa sidoo kale xaq-u-yeelan kara:

- **Shuruudaha dheeraadka ah ee loogu talagalay Baahida Degdegga ah** – qaatayaasha TANF/SFA ee la kulma xaalado degdeg ah, sida guri-ka-saarid ama ogeysiiska ka xiridda biyaha, gaaska iyo korontada, waxaa ay xaq-u-yeelan karaan ilaa \$750 mudd 12-bilood ah oo dheeraad ku ah deeqdooda bilaaha si loo daboolo baahida degdegga ah.
- **Gargaarka Kaashka ee Weecashada** – Codsadayaasha TANF/SFA ee la kulma baahida kharashaadka sida kirada ama lacagaha biyaha, gaarka iyo korontada waxaa ay xaq-u-yeelan karaan lacag-bixin hal-mar la bixiyo intii la siin lahaa deeq bille ah si loo xasilliyo xaaladda codsadaha ka hor inta aysan awoodin in ay helaan dakhli la isku hallayn karo.



WorkFirst

WorkFirst waa qaybta tababarka iyo shaqada gobolka Washington ee barnaamijka TANF/SFA, bixinaysa adeegyo loogu talagalay waalidiinta in ay u maraan ladnaanta dhaqaale si iyaga iyo carruurtooda u kobcaan.

Shaqaalaha gaarka ah ee WorkFirst waxaa ay taageeraan ka-qaybgalayaasha si ay u aqoonsadaan yoolalka shakhsi oo ayna uga qaybgalaan hawlo ku kordhiya guul barnaamijka. Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada, Waaxda Damaannada Shaqada, Guddiga Gobolka ee Kuleejyada Farsamada iyo Bulshada, iyo Waaxda Ganacsiga waxaa ay la hawlgalaan WorkFirst si ay ugu xiriiriyaan waalidiinta iyo daryeelayaasha fursado waxbarasho, tababar shaqo iyo fursado. Hay'ad kasta waxaa ay aqoonsan tahay qiimaha uu shakhsi kasta leeyahay iyo xirfadaha gaarka ah ee ay ku soo kordhiyaan bulshooyinkooda.

Shaqaalaha WorkFirst waxaa ay sidoo kale ku caawiyaan dadka in ay dhisaan aasaaska adag ee ladnaanta iyaga o bixinaya adeegyo taageero leh oo gacan ka geysanaya in ay meesha ka saaraan caqabadaha nidaamiga ah ee gelidda shaqada, oo ka mid ah dharka xirfadda, gaaska, dayactirka gawaarida, kharashka waxbarasho, qalabka iyo kharashaadka guuritaanka.

Barnaamijka Gargaarka Haweenka Urka Leh

Gargaarka Haweenka Urka Leh (PWA) waa barnaamij uu gobolka maalgeliyo oo siiyo deeq kaash ah haweenka uurka leh ee dakhligooda uu hooseeya, kuwaas oo aan xaq-u-lahayn Barnaamijyada Gargaarka Ku-meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF) iyo Gargaarka Qoyska ee Gobolka (SFA).



Xafiiska Gargaarka Qaxootiga iyo Muhaajirka

Dadka qaxootiga iyo muhaajiriinta ah waxaa ay heli karaan barnaamijyo iyo adeegyo gaar ah oo u horseeda xasillooni dhaqaale iyo is-dhexgal bulshooyinkooda.

Adeegyadan waxaa ka mid ah:

- Gargaarka caafimaadka iyo kaashka ee qaxootiga.
- Barnaamijyada Caafimaadka iyo Ladnaanta ee qaxootiga.
- Adeegyada shaqada.
- Barnaamijyada Ingiriiska Luuqadda Labaad ahaan.
- Maareynta kiiska ee dhammeystiran.
- Adeegyada Gargaarka Socdaalka iyo Jinsiyadda.
- Refugee Barnaamijka Saameynta Iskuulka.
- Daryeelka korsashada carruurta qaxootiga ah ee aan lala socon.
- Adeegyada caafimaadka dhimirka ee qaxootiga.
- Adeegyada jinsiyadda.

Xafiiska Qaybta Adeegyada Bulshada ee Gargaarka Qaxootiga iyo Muhaajirka waxaa uu la hawlgalaa in ka badan 60 hay'adood oo kala duwan, oo ay ku jiraan hay'adaha dib-u-dejinta qaxootiga, ururrada bulshada ku saleysan, ururrada diiradda saara qowmiyadaha, hay'adaha dowlad-goboleedka iyo hay'adaha waxbarashada. La-hawlgalayaasha ORIA waxaa ay ku takhasuseen bixinta adeegyo luuqad iyo dhaqan ahaan habboon.

Fadlan ogow in dhammaan macluumaadka lala wadaagay DSHS iyo la-hawlgalayaasheenna bulshada in ay yihiin kuwo sir ah oo ilaalsan. Lama wadaagno hay'adaha kale ee dowladda.



Barnaamijyada Gargaarka Caafimaadka

Barnaamijyada Gargaarka Caafimaad ee la maamulo iyadoo loo marayo Qaybta Adeegga Bulshada waxaa inta badan loo tixraacaa sida Medicaid Caadiga ah. Barnaamijyada Medicaid Caadiga ah waxaa ay bixiyaan caynsanaanta daryeelka caafimaad ee shakhsiyaadka da'doodu tahay 65 sano jir ama ka weyn, indhoollaha ama kuwa loo tixgeliyo in ay naafo yihiin iyada oo la raacayo jaangooyooyinka Damaannada Bulshada. Si xaq loogu yeesho barnaamijyada Medicaid Caadiga ah, shakhsiga waa in uu soo buuxiyo xaddadka dakhliga iyo khayraadka iyo sidoo kale jaangooyooyinka da'da ama naafada. Barnaamijyada Medicaid Caadiga ah waxaa ka mid ah:

- **Barnaamijka Caafimaadka SSI-La Xiriira ee Qaybta Baahan (CN).** Barnaamijkan wuxuu caymis siinayaa shakhsiyaadka buuxiya xaddadka dakhliga iyo khayraadka SSI.
- **Barnaamijka SSI-La Xiriira ee Caafimaad ahaan Baahan (MN).** Barnaamijkan, sidoo kale loo yaqaano “buuxinta dhammaan shuruudaha marka laga reebo dakhliga”, wuxuu bixiyaa caynsanaanta shakhsiyaadka dakhligooda uu ka sarreeyo xaddadka dakhliga iyo khayraadka SSI. Shakhsiyaadka u-qalma, waxaa ay xaq u yeeshaan caymiska MN ka-dib marka ay bixiyaan kharash caafimaad la mid ah qaddarka dakhliga qoyska ee ka badan heerka dakhliga SSI.
- **Barnaamijka Kaydka Medicare (MSP).** Barnaamijkan wuxuu ku caawinayaa qaatayaasha Medicare in ay bixiyaan dhammaan ama qayb ka mid ah lacagta ay sida joogtada ah u bixiyaan ee Medicare.
- **Adeegyada Daryeelka Caafimaad (MCS).** Barnaamijkan wuxuu bixiyaa caynsanaanta shakhsiyaadka loo arko in ay xaq u leeyihiin barnaamijka U-gudbinta Guryaynta iyo Baahiyada Aasaasiga ah (HEN) ama Waayeellada, Indhoollaha, ama Naafada (ABD) balse aan xaq u lahayn Medicaid Caadiga ah iyo barnaamijyada kale ee gargaarka caafimaad iyada oo sabab u ah xaalkooda muwaadinimo.

Codsiyada waraaqaha ah ee kaashka iyo cuntada waxaa laga heli karaa www.dshs.wa.gov/esa/community-services-offices/how-apply-services ama iyadoo laga wacayo Xarunta Xiriirka Macmiilka 1-877-501-2233.

Codsiyada waraaqaha ah ee Medicaid Caadiga ah waxaa laga heli karaa www.hca.wa.gov/health-care-services-supports/forms-and-publications ama iyadoo laga wacayo Xarunta Xiriirka Macmiilka 1-877-501-2233.



Macluumaad Guud

Waxaa jira dhowr siyaabood oo adeegyadan looga codsado DSHS:

- Wareysiya shakhsi ahaan loogu sameeyo Xafiiska Adeegga Bulshada (CSO) ee degaanka. Kuwan waxaa loo bixiyaa si ku saleysan in loo adeegayo, qofka ugu hor imaada; hase-yeeshee, qof kasta ee soo gala wixii ka horreeya 3 galabnimo ayaa la arki doonaa maalintaa.
- Online-ka oo ah www.WashingtonConnection.org.
- Soo gudbi codsi waraaq ah:
 - Shakhsi ahaan: Ku rid codsiga warqadda ah sanduuqa lagu rido ee Xafiiska Adeegga Bulshada ee degaanka.
 - Fakis: 1-888-338-7410
 - Boosto: PO Box 11699, Tacoma, WA 98411.

Codsiyada waraaqaha waxaa laga heli karaa www.dshs.wa.gov/esa/community-services-offices/how-apply-services ama adiga oo ka wacaya Xarunta Xiriirka Adeegga 1-877-501-2233.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyada kale ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS), fadlan booqo mareegtadeenna oo ah www.dshs.wa.gov.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

DSHS 22-1786 SM (11/18) Somali